## Ardayda qaba Naafonimada iyo Waalidiintooda:

## Isbarbardhiga Xuquuqda Hoos timaada IDEA iyo Cutubka 3323 ee Barnaamijka Baahiyaha Gaarka ah ee Jon Peterson

| IDEA iyo Cutubka 3323 | Barnaamijka Deeqda Waxbarashada Peterson |
|---|---|
| Dugsi Degmadeedka Dadwaynaha waa inuu bixiyo **Waxbarasho Dadwayne oo bilaash ah oo ku Habboon (FAPE)** waana inuu siiyo ardayda naafada ah.<br>Waxbarashada **Dadwaynaha ku Habboon ahna Bilaashka** waxaa ku jira waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xariira ee:<br>• Lagu bixiyo lacag la'aanta;<br>• Buuxiya heerarka Waxbarashada Waaxda Ohio;<br>• Waxaa ku jira waxbaraahada dugsiga barbaarinta, dugsiga dhexe, ama dugsiga sare; iyo<br>• Lagu bixiyo qaab ku habboon IEP oo buuxinaaya heerarka Ohio ee IEP-da.<br>Waxbarashada gaarka ah waxaa tilmaamo si gaar ah loogu talagalay baahiyaha ilmaha naafada ah.<br><br>Tusaalooyinka adeegyada la xiriira waxaa ka mid ah gaadiidka, adeegyada barashada luuqada hadalka, adeegyada maqalka, adeegyada turjubaanka, baxnaaninta jidhka iyo shaqada, madadaalada, iyo adeegyada la-talinta. | Ilmaha ka qaybgala barnaamijka deeqda waxbarasho ee Jon Peterson waa arday si gaar ah loo meeleeyay, una qalma FAPE. |
| FAPE waa in waalidiinta lagu siiyaa qaab lacag la'aan ah. | Ardayga ka qaybgalaya wuxuu helayaa deeq waxbarasho oo dhan ilaa $30,000 si uu ugu bixiyo barnaamijka waxbarashada gaarka ah oo uu bixiyo bixiye gaar ah oo diiwaan gashan ama bixiye dadweyne oo kale. Haddii kharashka barnaamijka uu ka badan yahay deeqda waxbarashada, waalidka ayaa ka mas'uul ah. |
| Degmo dugsiyeedka dadwaynaha ayaa looga baahan yahay inay **QIIMEEYAAN** ardayda naafada looga shakisan yahay, oo ay ku jiraan ardayda ku jira barnaamijyada gaarka ah ee degmada gudaheeda kajira. | Degmo dugsiyeedka dadwaynaha ayaa looga baahan yahay inay **QIIMEEYAAN** ardayda naafada looga shakisan yahay, oo ay ku jiraan ardayda ku ji barnaamijyada gaarka ah ee degmada gudaheeda. |
| Degmo dugsiyeedka dadwaynaha ayaa diyaarisa **IEP-da hore** marka arday la oggaado inuu u qalmo sida ku xusan IDEA. | Degmo dugsiyeedka dadwaynaha ayaa diyaarisa **IEP-da** hore marka arday la oggaado inuu u qalmo sida ku xusan IDEA.<br>Ardaygu uma qalmo deeq waxbarasho ilaa IEP-da hore laga soo gabagabeynaayo. |
| **Bixinta adeegyada.** Degmo dugsiyeedka ayaa looga baahan yahay inay bixiso dhammaan adeegyada lagu xusay IEP. | **Bixinta adeegyada.** Deeqdaan waxbarasho ayaa loo adeegsan doonaa oo keliya kharashka barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee fulinaya IEP-da ilmaha. Hase yeeshee, ma jirto wax shardi ah oo dhigaaya in bixiyaha deeqda waxbarasho uu bixiyo dhammaan adeegyada lagu xusay IEP. |
| **Dib u eegista sanadlaha ah ee IEP-da**. Sanad walba, ama in kasii badan hadba marka ay habboon tahay, kooxda IEP-da waxay dib u eegaysaa IEP-da. | **Dib u eegista sanadlaha ah ee IEP-da.** Kooxda IEP-da waxay dib u eegtaa IEP-da sanad walba. |



Department of Education & Workforce

| | |
|---|---|
| **Dib u qiimeynta**. Degmo dugsiyeedku waxay dib u qiimeysaa ardayga saddexdii sanaba mar, ilaa waalidka iyo degmadu ku heshiiyaan in dib u qiimeyntu inaysan muhiim ahayn maahee. | **Dib u qiimeynta.** Degmo dugsiyeedku waxay dib u qiimeyn doontaa ardayga saddexdii sanaba mar, ilaa waalidka iyo degmadu ku heshiiyaan in dib u qiimeyntu inaysan muhiim ahayn maahee. |
| **Qiimeynta Waxbarashada Madaxa-Banaan.** Waalidku wuxuu u qalmaa IEE ayadoo kharashka ay bixinayaan dadwaynaha haddii waalidku uusan ku qancin qiimaynta, ilaa dugsigu bilaabaayo nidaam cadaaladeed si uu u difaaco qiimayntiisa. | **Qiimeynta Waxbarashada Madaxa-Banaan.** Waalidku wuxuu u qalmaa IEE ayadoo kharashka ay bixinayaan dadwaynaha haddii waalidku uusan ku qancin qiimaynta, ilaa dugsigu bilaabaayo nidaam cadaaladeed si uu u difaaco qiimayntiisa. |
| **Dhexdhexaadinta.** ODE waxay bixisaa dhexdhexaadin kharash la'aan ah si loo xalliyo khilaafaadka sida ku xusan IDEA. | **Dhexdhexaadinta.** ODE waxay bixisaa dhexdhexaadin lagu xallinaayo khilaafaadka u dhexeeya waalidiinta iyo degmo dugsiyeedka dadweynaha ee la xariira abuurista IEP-da, laakiin ma ahan khilaafyada u dhexeeya waalidiinta iyo bixiyaasha deeqda waxbarasho. |
| **IEP-da La Fududeeyay.** ODE waxay bixisaa fududeeyaal si ay gacan uga geystaan abuurista IEP-da, haddii la codsado. | **IEP-da La Fududeeyay.** ODE waxay bixisaa fududeeyaal si ay gacan uga geystaan abuurista IEP-da, haddii la codsado. |
| **Cabashooyinka.** ODE waxay baaritaan ku sameysaa dacwadaha qoraalka ah ee sheegaya in degmadu ay ku xad gudubtay shuruuda xeerka IDEA ama Ohio. Xeerka 3301-51-05. | **Cabashooyinka.** ODE waxay baaritaan ku sameysaa dacwadaha qoraalka ah ee sheegaya in degmadu ay ku xad gudubtay shuruuda xeerka IDEA ama Ohio. Xeerka, laakiin ma baari doonto eedaha la xariira hirgelinta IEP-da ee uu soojeediyo bixiyaha ama in ilmuhu helay FAPE iyo in kale.<br><br>ODE waxay baaritaan ku sameyn doontaa cabashooyin qoraalka ah ee sheegaya in bixiyaha uu ku xadgudbay mid ka mid ah shuruudaha lagu dejiyay qawaaniinta ama xeerarka deeqda waxbarashada ee Peterson. |
| **Codsiyada Dhageysiga Caddaalada ah.** Waalidiinta iyo ardayda waxay xaq u leeyihiin inay xareeyaan codsiga dhageysiga caddaalada ah si loo bilaabo nidaamka maamulka ee lagu eegaayo go'aanada adag ee la xariira aqoonsiga, qiimeynta ama meelaynta goobta waxbarasho ee ilmaha naafada ah, ama bixinta FAPE ee ilmaha. | **Codsiyada Dhageysiga Caddaalada ah.** Waalidka ama ardayga wuxuu xareyn karaa codsiga dhageysiga caddaalada ah si loo bilaabo nidaamka maamulka ee lagu eegaayo go'aanada adag ee la xariira aqoonsiga, qiimeynta ilmaha, laakiin ma xarayn karaan codsi dhageysiga caddaalada ah ee lagu eegaayo adeegyada uu bixiyo bixiyaha gaarka ah ama haddii ilmuhu helay FAPE markii laga qoray barnaamijka deeqda waxbarasho. |
| **Go'aaminta Waxa Keenay Hab-dhaqanka.** Degmo dugsiyeedka dadweynaha waxay eegtaa waxa keenay hab-dhaqanka marka ardayga naafada ah, xadgudub ku ah xeerka anshaxa ardayga awgeed, laga saaro goobtiisa waxbarasho ee waqti dheer. Kooxda IEP-da waxay sameeyaan dib u eegistaan si ay u go'aamiyaan in hab-dhaqanka walaaca leh ay keentay naafonimada ardayga ama ay tahay natiijada tooska ah ee dugsiga dadwaynaha ee ku guul dareystay fulinta IEP-da. Haddii kooxdu ay oggaato in hab-dhaqanku yahay mid sababay naafonimada, waa inay sameeyaan qiimaynta hab-dhaqanka lagu oggaanaayo waxa keenay (functional behavior assessment, FBA) oo ay abuuraan qorshe dhexgalka dabeecadda (BIP) ama dib u eegaan oo waxna ka beddelaan BIP-ga ardayga ee jira hadda. | **Go'aaminta Waxa Keenay Hab-dhaqanka.** Ardaydu waxaa lagu hagaa xeerarka edbinta ee bixiyaha gaarka ah. Ardayga waa laga joojin karaa ama waa laga eryi karaa goobta haddii uu sameeyo haddii uu ku xadgudbo xeerarka shaqada bixiyaha. |

*Waaxda Waxbarashada iyo Xoogsatada Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) kuma takoorto shakhsiyaadka hab ku salaysan isir, diin, lab iyo dhedig, dhalasho, da', naafo, ama asal qowmiyadeed. Waaxda Waxbarashada iyo Xoogsatada Ohio waa loo-shaqeeye fursad siman iyo bixiye adeegyada ADA. Ogeysiiska Takoor La'aanta Waaxda waxay khusaysaa dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha. Eeg Nidaamka Xeerka Takooridda Naafada iyo Xeerka Cabashada Takooridda ee Waaxda. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ogeysiiska kahortaga takoorka, booqo ocrcas.ed.gov/contact-ocr si aad u heshid ciwaanka iyo lambarka talefoonka xafiiska u adeega degaankaaga, ama wac 1-800-421-3481.*



Department of Education & Workforce